



Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya wuxuu waafaqsan yahay diinta Islaamka, waxkasta oo ka hor imaanaya shareecada Islaamka way ka reeban yihiin dalka Soomaaliya sida ku cad qodobka 2AAD ee Dastuurka

Farqada 1AAD (1) Islaamku waa Diinta Dawladda.

Farqada 2AAD (2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka.

Farqada 3AAD (3) Lama soo saari karo sharci aan waa-faqsaneyn Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqa-asiiddeeda.

Maadaama Dastuurku waafaqsan yahay shareecada Islaamka Islamarkaana yahay heshiis bulsho diinta Islaamku waxay reebtay in laga baxo heshiisyada dadka dhexdooda ah & bala-maha beenta ah, Quraanka Kariimka ah Suuratul Maa'ida Aayada Koowaad ilaahay wuxuu ku leeyahay Kuwa alle rumeeyoow oofiya waajibaadkiina.

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَوْفُوا بِالْعُقُودِ أُحِلَّتْ لَكُمْ بَهِيمَةُ الْأَنْعَامِ إِلَّا
مَا يُتْلَىٰ عَلَيْكُمْ غَيْرَ مُحِلِّي الصَّيْدِ وَأَنْتُمْ حُرْمٌ إِنَّ اللَّهَ يَحْكُمُ مَا يُرِيدُ